



# Kharash cadaalad ku salaysan

In kharashyada boosaska dugsiyada xannaanadda, goobaha wakhtilummiska iyo goobaha kale ee wax lagu barto, laga wada siman yahay waa arrin cadaaladda ku salaysan. Sidaas awgeed, Dowladda hoose Köping waxay ku dhaqaaqi doontaa kontroolka kharashyadii 2017 la bixiyay. Waxaa laysku iirin doonaa ama lays barbardhigi doonaa warbixintii daqliga Dowladda hoose la siiyay iyo daqliga canshuurta laga bixiyay ee ka diiwan gashan Hay'adda Canshuuraha Skatteverket.

Haddii la shaac-bixiyo in qofku u bixiyay kharash ka badan kharashkii saxa aha, waa loo soo celinayaa farqiqa. Haddiise la shaac-bixiyo in qofku u bixiyay kharash ka yar kharashkii saxa aha, waxaa loo soo diraya warqadda lacagta lagu bixiyo, taasoo ku qoran farqiqa. Haddii lacagta aysan ka badnayn 600 karoon lama bixiyo mana la soo celiyo.

Kontroolka kharashka waxaa lagu dhaqaaqa markii laba sano ka soo wareegato goortii la bixiyay. Warbixinta Hay'adda Canshuuraha Skatteverket ka hor lama heli karo.

## Warbixin dheeraad ma u baahan tahay?

Warbixin dheeraad waxaad ka aqrisan kartaa shabakadda internetka:  
[www.koping.se/avgiftskontroll](http://www.koping.se/avgiftskontroll).

Wixii su'aallo ah ee xiriir la leh kontroolka kharashka waxaad ku waydiin kartaa adigoo adeegsada e-mail ama taleefan.

E-mail: [avgiftskontroll.uf@koping.se](mailto:avgiftskontroll.uf@koping.se)

Taleefan: 0221- 259 47.

Saaxadaha taleefan soo dirida waa isniin ilaa khamiis 10-12.



**KÖPINGS  
KOMMUN**